

Gaadiidka wakhtiyada xaaladaha degdegga ahi aanay jirin (NET) waa faa'ido qarashkeeda uu daboolaaayo MaineCare, waxaana loo qorsheeyay si uu kaaga caawiyo inaad ku tagto Adeegyada ay Daboolays MaineCare.

Haddii adeegyada lagu diido, waxa lagu oggolyahay 60 cisho oo aad rafcaan kaga qaadan karto go'aanka kaasi oo qoraal ah. Haddii aanad rafcaan ku qaadan 60 ka cisho xaqqa aad u lahayd inaad rafcaan qaadata waa uu kaa burayaa.

Boos Celinaha iyo Lambarada Caawimada ee Gaadiidka oo Gobol Gobol ah

Gobolka 1aad - Pattern, Danforth, Aroostook

Boos celinaha - 855-608-5174

Lambarka Caawimada Gaadiidka(Ride Assist) - 855-608-5175

Gobolka 2aad - Washington and Hancock

Boos celinaha - 855-608-5176

Lambarka Caawimada Gaadiidka (Ride Assist) - 855-608-5177

Gobolka 6aad - Cumberland (Brunswick and Harpswell excluded)

Boos celinaha -855-608-5178

Lambarka Caawimada Gaadiidka (Rise Assist) - 855-608-5179

Gobolka 7aad - Oxford, Androscoggin and Franklin

Boos celinaha - 855-608-5180

Lambarka Caawimada Gaadiidka (Ride Assist) - 855-608-5181

Gobolka 8aad - York, Brownfield, Denmark, Fryeburg, Hiram, Porter Lovell, Stoneham, Stow, Sweden cities in Oxford County

Boos celinaha - 877-659-1302

Lambarka Caawimada Gaadiidka (Ride Assist) - 877-659-1303

ModivCare waxa ay maaraya gaadiid raaca caadiga ah ee lagu raadsanayo caafimaadka oo ku kooban kaliya qorshayaal daryeel caafimaad. Nasoo wac! Xirfadleh ushaqeeya ModivCare ayaa ku caawin doona.



modivcare™
FORMERLY LOGISTICARE

www.modivcare.com

Copyright © 2021 Modivcare®
Solutions LLC All Rights
Reserved.

modivcare™
FORMERLY LOGISTICARE

**Sida aad uheli karto
Gaadiidka Wakhtiyada Aanay
Xaalad Degdeg ahi Jirin (NET):**

Adeeg loogu talo galay
Xubnaha MaineCare

Gaadiidka NET ee Caadiga ah

Nooca gaadiidka ee ku diyaarka noqon doonaa waxa uu ku xidhnaan doonaa meesha aad joogto iyo xaaladaada. Waxaa ka mid noqon kara:

- Gaadhi, Bas yar, Taksi
- Gaadhi Curyaan, Gaadhi ku Dallici kara
- Gaadiidka Dadweynaha
- Mid Lacagta laguugu Celinayo inta Aad Raacdo (qoyska iyo saaxiibada)

Gaadiidka sida loogu talo galay waxa weeye inay kaa qaadaan kuna dhigaan guriga hortiisa, dareewaladana looma oggola caadi ahaan inay galaa guryaha xubnaha ama xarumaha caafimaad. Si kastaba ha ahaate, Modivcare waxa ay ansixin kartaa inay kusiiso taa baddalkeeda, oo heer adeeg iyo caawimo oo ka sarraysa intaa ah (sida albaabka guriga lagaa qaado laguguna soo celiyo) tanoo ku xidhan baahiyaha shakhsiga ah ee xubinta.

Fadlan diyaar ahow marka gaadiidka ku qaadayaa yimaado. Dareewalada waxaa looga baahan yahay inay sugaan muddo 10 daqiiqo ah kadib wakhtiga ballanta in lagu soo qaadaa ay tahay.

Maxaa ay tahay inaad filato:

- Xog caafimaad iyo shakhsiyeed oo ilaashan
- Adeegyada Xirfadaysan
- Dareewalo ixtiraam iyo edeb leh
- Gaadiid wakhtiga ballanta aan kasoo daahayn

Haddii ay xaalad degdeg ahi kusoo waajahdo, fadlan wac 911.

Sida loo Samaysto Boos Celin

Boos celinaha ballamahaaga waxa aad usamaysan kartaa sida soo socota:

- Adoo isticmaalaya Taleefanka: Isniinta - Jimcaha laga bilaabo 8:00 subaxnimo illaa 5:00 galabnimo.
- Onlayn wakhtiga aad doonayso

Si aad safarkaaga ballan ugu samaysatid onlayn booqo: www.member.logisticare.com

Si aad ballan u samaysato adoo isticmaalaya taleefan, fadlan dib uga tixraac lambarada Caawimada Gaadiidka iyo Boos celinaha ee Gobolka iyo Degmada.

Si aad uballan sato gaadiidkaaga waxa aad u baahan tahay:

- Lambarka Aqoonsiga ee Xubinimadaada
- Magaca iyo cinwaanka bixiyaha adeega MaineCare
- Taariikhda iyo Wakhtiga Ballanta
- Wakhtiga iyo Goobta Qaadista

Ogow: Dhammaan safarada caadiga ahi waxa ay u baahan yiin ogeysiis laba (2) maalmood oo shaqo ah adigoo kusoo codsaya taleefan ama onlayn.

Boos celinaha loogu talo galay ka bixida dhakhtarka iyo qaadidda degdegga ah waxaa la samayn karaa 24ka saacadood maalintii, todobada cisho todobaadkii.

Xubnaha Dhaqaha La'

Wac Adeegga Gudbinta ee Maine 711

**CAAWIMADA LUUQADA WAA KUUGU DIYAAR
DHAMMAAN KHADADKA**

Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo

Yaa ii diyaarin kara gaadiidkayga? Adiga, qof qaraabadaada ah, xubin kamid ah dadka ku daryeelaya, maareeyaha kiiska qorshaynta ama mattalaha xarunta caafimaad waa ay soo wici karaan si ay kuugu diyaariyaan gaadiid.

Ka warran haddii aan ubaahdo gaadhi curyaan ama kursiga gaadhiga? Waxa lagaaga baahan yahay inaad adigu keensato gaadhi curyaankaga. Haddii kursi gaadhiga ah loo baahdo, fadlan qofka kula hadlaya ogeysii marka aad soo wacayso.

Ka warran haddii ballantayda la joojiyo ama dib wakhtigeedii loo dhigo? Haddii ballantaada la joojiyo ama dib wakhtigeeda loo dhigo, fadlan wac islamarkaba Modivcare (ama ugu yaraan ka hor laba saacadood wakhtiga ballanta qaadista) si markaasi aanu dib ugu dhigno ama u joojino safarka ugana hortagno safar aan loo baahnayn oo uu sameeyo bixiyaha gaadiidku.

Maxaa aan sameeyaa haddii gaadhigaygu soo habsaamo? Fadlan wac Lambarka Caawimada Gaadiidka (Ride Assist) si aad u hesho caawimo degdeg ah.

Ka warran haddii aanan hubin wakhtiga aan soo noqonayo? Waxa aad wici kartaa Lambarka Caawimada Gaadiidka (Ride Assist) si aad u hubiso wakhtiga aad udoorato wakhtiga kuu ballan san ama waxa aad dooran xulashada ah "Waan Idin Soo Wici Doonaa" marka laysoo qaadayo. Wakhtiga aad sugayso "Waan Idin Soo Wici doonaa" marka laysoo qaadayo waxa uu noqon karaa illaa hal saac.

Sidee ayaa aan usoo gudbin karaa tabasho? Filashadayadu waxa ay tahay in safar kasta si amni ah loo dhammaystiri doono wakhtigiisana la dhammaystiri doono iyo in dhammaan dhinacyada kala duwan ee adeega loo bixin doono qaab uu ku jiro ixtiraam iyo naxariis. Haddii tayada adeeggu aanu gaadhsiisnayn heerkii la doonaayay, waa aanu dabo galnaa sida ugu degdegga badana waanu uga jawaab celinaa. Haddii aad qabto cabasho, fadlan ka wac Modivcare 1-877-659-1303.

Fadlan wac Lambarka Caawimada Gaadiidka (Ride Assist) haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah.